SOMALI

# Su'aallaha Intabadan La Isweydiiyo Barnaamijka Lacagta Taakulada Pre-K

**1 Qofkee codsan kara Arjiga Taakulada Lacagta Pre-K?**
*Qoysaska lagu aqbalo Hannaanka Bakhtiyaanasiibka Pre-K boos lacag la bixiyo ee buuxiya shuruudaha hoose ku qoran sidoo kalne ilmahoodu is joogta ah iskuulka u xaadiro waxay codsan karaan taakulada lacagta.*

**2 Sidee qoysku u codsadaa?**
*Qoysasku waxay u codsadaan haddii ay buuxiyaan Arjiga Taakulada Lacagta Pre-K, haddii ay keenaan dukumentiga xoojinaya arjigooda, sidoo kale haddii ay iskuulka ilmaha aqbalay u soo gudbiyaan dukumentiyada oo idil.*

**3 Halkee qoysku arjiga ka heli karaa?**
*Arjiyada waxaa laga heli karaa iskuulka Pre-K ee laga aqblay in ilmuhu dhigto, Xarunta Macluumaadka Qoyska, shabakada MNPS iyo Laanta Pre-K.*

**4 Ma jiraan dukumenti looga baahan yahay in qoysku soo raaciyo markuu soo gudbinayo arjiga?**
*Haa, qoyska waxaa looga baahan yahay inay keenaan dukumenti si ay u xoogiyaan shuruuda taakulada. Dukumentiga caddaynta dakhliga iyo Foomka Caddaynta Dakhliga (laga helo iskuulka aqbalaya) waa labada dukumenti ee looga baahan yahay in waalidku u soo gudbiyo iskuulka aqbalaya isagoo ku soo lifaaqaya arjiga.*

**5 Waa maxay waxyaabaha loo soo gudbin karo inay yihiin dukumenti caddaynaya dakhliga?**
*Dukumentiga caddaynta waxaa ka mid noqon kara inkastoo aysan ku koobnayn nuqulka jeega aad qaadatid, W-2, cashuur celinta, caddayn maxkamadeed ama sharci, qoraal dhakhtar, caddaynta shirkada loo shaqeeyo ama diiwaan la soo daabacay.*

**6 Halkee qoysku arjiga u soo gudbiyaa?**
*Arjiga Taakulada Lacagta Pre-K iyo dukumentiga xoojinaya waa in loo soo gudbiyo iskuulka aqbalaya Pre-K.*

**7 Sidee go'aamada la gaaro loogu soo gudbiyaa qoysaska?**

*Go'aamada waxaa la gaaraa marka dib loo eego dukumentiga hoos ku qoran ee loo baahan yahay, si loo xaqiijiyo in shuruudaha taakulada la buuxiyey. Go'aanada waxaa qoysaska loogu soo diri doonaa boosta iyo emailada.*

**8 Arjiga yaa dib u eega?**
*Arjiga waxaa dib u eegi doona Agaasimaha Laanta Pre-Kindergartenka.*

**9 Waa maxay shuruudaha la adeegsado si loo gaaro go'aanka ansixinta?**
*Ansixinta waxaa lagu go'aamiyaa shuruudaha soo socda:*

- ***Dhibaato ama Xaalada Degdeg ku ah Qoyska** – Qoysku wuxuu la tacaalayaa duruufo aan caadi ahayn oo waqtigan saamaynaya dakhliga waalidka ama masuulka sharicga ah sida, inkastoo aysan intan ku koobnayn:*
  - *Daryeel xubno kale oo ka mid ah qoyska (tus., waalid da'a, caruur, qof qoyska ka mid ah oo naafo ah)*
  - *Shaqo la'aan; isbedel ba'an oo dakhliga ah ama kharashaadka*
  - *Naafanimo waqti kooban ama waqti dheer*
  - *Xaalad caafimaad oo aan la filayn ama xaalad degdeg ah oo la xiriira caafimaadka*
  - *Waqtigan ay haysato dhibaato dhaqaale ama khasaare loo jeedo*
  - *Hal ilmo ama ka badan oo ku jira xannaanada caruurta lacagta la bixiyo*
- ***Dhibaato** – Qoysku wuxuu la tacaalayaa arin dhibaato weyn oo waqtigan saamaynaya dakhliga ama kharashka waalidka ama masuulka sharicga ah sida, inkastoo aysan intan ku koobnayn:*
  - *Geeri ku timaada mid ama ka badan waalidka, masuulka, ama qof muhiima oo qoyska ka mid ah taasoo isbedel ku keenta faa'iidada dakhliga ama kharashaadka soo gala qoyska*
  - *Jiro aan la filayn oo saamaynaysa shaqada, faa'iidada ama kharashaadka*
  - *Furiin ama kala maqnaansho saamaynaysa dakhliga qoyska kadib markay doorteen barnaamijka Pre-K*
  - *Khasaare ama waxyeelo ka dhashay dab ama masiibo dabiici ah oo guriga haleesha*
- ***Isbedel Dhinaca Dakhliga** – Isbedel dakhli oo dhaca intii arjiga la soo gudbiyey iyo sanad dugsiyeedkan.*

**10 Sidee qoysku go'aanka ku heli doonaa?**
*Qoysaska waxaa boosta loo soo dhigi doonaa warqad lagu ogeysiinayo ansixinta ama diidmada sidoo kale waxaa email u soo dira Laanta Pre-Kindergartenka (waa haddii email laga hayo).*

**11 Haddii la ansixiyo, kaalmo intee le'eg ayuu qoysku heli doonaa?**
*Qoysaska la siiyo ansixinta waxaa laga dhimi doonaa 25% caddadka lacagta la bixiyo ee lagu go'aamiyey halbeega lacagta ku salaysan dakhliga.*

**12 Qoysku go'aanka rafcaan maka qaadan karaa?**
*Qoysasku go'aanka rafcaan kama qaadan karaan, balse waxay dib u soo gudbin karaan dhammaan dukumentiyada kale ee loo baahan yahay si ay u xoojiyaan shuruuda kor ku xusan.*

***13* Shaqaalaha MNPS ma codsan karaan taakulada?**
*Haa, shaqaalaha MNPS waxay codsan karaan iyagoo adeegsanaya nidaam la mid ah ka loogu talagalay lacagta taakulada waxbarashada.*

**14 Waa maxay sababta lacag looga bixinayo Iskuullada Dawladda ee Pre-K?**
*Pre-K waxaa loo maalgeliyaa qaab ka duwan K-12. Ma aha fasal ay khasab tahay in la dhigto. Pre-K waxaa gudoonka u suurtogeliyey oo la adeegsadaa lacagaha Gobalka, Federaalka iyo degmada. MNPS waxay bixiyaan boosas ka badan 1500 waxaana loogu talagalay qoysaska buuxiya Shuruudaha Saboolnimada Federaalka sida waafaqsan Deeqaha Gobalka iyo Federaalka. Dhammaan boosaska soo hadha waxay u furan yihiin qoysaska codsada. Si loo sii ambaqaado bixinta adeegyada Pre-K tayadoodu sarayso, lacagta waxaa loo qaadaa si loogu kabo kharashka.*

**15 Waqti intee le'eg ayey qaadataa in la helo go'aanka ugu danbeeya?**
*Go'aanka waxaa la gaadhaa 2 todobaad gudahood marka qoysku soo gudbiyo Arjiga Taakulada Lacagta Pre-K.*